

ATTENDANCE MATTERS

Advancing student success by reducing chronic absenteeism.



DISTRICT196

One District. Infinite Possibilities.

www.district196.org/attendancematters

MA OGTAHAY?

Cilmi-baadhistu waxay muujineysaa markay ardaydu si joogta ah u-tagaan iskuulka, way la qabsadaan oo ku xiramaan bulshadooda, sida loo sameeysto saaxiibo muhiim ah, si loo xoojiyo dareenka xirfadaha bulshada taasina waxay sababtaa inta badan inay ka qalin-jabiyaan iskuulka sare.



Ku caawi ilmahaaga inuu ka guulaysto ama horumar ka gaadho Iskuulada Dadweynaha ee Rosemount-Apple Valley-Eagan, guushaasina waa inay caado u noqoto ilmahaaga inuu yimaado iskuulka maalin kasta! **Attendance Matters** waa waxqabadka degmada, hawlgalkaa firfircoona waxaan ku hubinaynaa in ardaydayadu ay joogaan maalin kasta Iskuulka. Sida aan ognahay, guusha iskuulku waxay gacanta ugu jirtaa imaanshaha wanaagsan.

Imaantinka Iskuulka ee joogtada ah waxay ka caawinaysaa caruurta inay ku fiicnaadaan iskuulka – oo ay ku kalsoonaadaan naftooda. imaanshahan joogtada ahna ka bilow xanaanada caruurta si ay u bartaan isla markiiba iskuulka tagistiisa, maalin kastana waa muhiim. Xaadirinta ama imaanshaha wanaagsani waxay ka caawineysaa caruurta inay ku fiicnaadaan iskuulka sare, koolajka iyo wixii ka dambeeya.

Ma ogtahay: Cilmi-baadhistu waxay muujineysaa marka ardaydu si joogta ah u-tagaan iskuulka, way la qabsadaan oo ku xiramaan bulshadooda, sida loo sameeysto saaxiibo muhiim ah, si loo xoojiyo dareenka xirfadaha bulshada taasina waxay inta badan u eeg tahay inay ka qalin-jabiyaan iskuulka sare.

Goorma ayuu maqnaanshu dhibaato noqoodaa?

- Imaanshaha joogtada ah ee fasalka 9aad waxay saadaalin fiican u tahay in ilmahaasi toos u qalin jabinayo ayna ka fiican tahay dhibcaha imtixaanka fasalka 8aad.
- Marka ilmuhu maqnaado boqolkiiba 10, ama qiyaastii 18 maalmood, sanad dugsiyeedka si weyn ayey guusha waxbarashada ardayga u saameynaysaa.
- Ardaydu waxay maqnaan karaan hadii laga fursan waayo maalin ama laba dhowrkii wiigba.
- Imaanshaha joogtada ahi waa u muhiim xirfada nolosha waxayna ka caawinaysaa ilma-haaga inuu ka qalin jebiyoo koolajka oo uu shaqadiisana haysto.

WAXA AAD SAMEYN KARTID

- Ka hadal muhiimada ay teedahay in maalin kasta iskuulka la yimaado.
- Ka caawi cunugaaga inuu yeesho jadwal maalmeed si uu u dhamaystiro shaqada guriga oo uu seexo hurdo fiican habeenkii.
- Isku day in aadan balamaha u dhigin xiliga iskuulku socdo.
- Soo ogow inuu ilmahaagu ku dareemo fasalada dhexdooda aaman ama aand loo hanjabin iskuulka dhexdiisa. Iska hubi inaanu wiilku/gabadhu fasalka uga maqnaanin arrimo dabeecad xumo ama anshaxa xumad iskuulka laga galo.
- La socoshada horumarka tacliinta iyo hadii loo baahdo caawis in laga raadsado macalimiinta.
- La soco xiriirka bulshada ee ilmahaaga. Cadaadiska ardaydu is cadaadinayaan ama is dhibayaan waxay u horseedi kartaa inuu ilmuhu iskoolka goo'yo, markaa ardaydu ayna asxaab laheyn waxay dareemaan kali.
- Ku dhiirigeli ilmahaaga iskuulka dabadii cayaaraha la ciyaaro iyo naadiyada.

MAQNAANSHAHA JOOGTADA AH WAA

18 maalmood iyo wixii ka badan



CALAAMADAHA DIGNIINTU WAA

10 ilaa 17 maalmood



WAXAA MACQUULAH

9 maalmood iyo ka yar



#AttendanceMatters

Iskuulada Dadweynaha ee Rosemount-Apple Valley-Eagan waxay u heelan yihiin guusha arday kasta oo ka mid ah degmada, iyo hagitaanka Xeerka Guulaha Guud ee Arday kasta, waxaan aragnaa qiyaasta qalin-jabinta oo kor u sii kacaysa. Caawintaadu waxay horumarin kartaa guusha ardayga iyadoo la yaraynaayo maqnaanshaha joogtada ah iyo hubinta la hubinaayo in ardaydu diyaar u yihiin fasaladooda maalin kasta.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaad ka helayaa website-kan:

www.District196/attendancematters.



Waxaad ku mahadsaa Attendance Works xaadiriska oo na siiyey macluumaadkan waxtarka leh.